

Somali

### **Waa maxay State-wide Equipment Program (SWEP) (Barnaamijka Qalabka Dowlad-goboleedka oo dhan)?**

Barnaamijka Qalabka Dowlad-goboleedka oo dhan ah (SWEP) waa barnaamij ay maamusho Ballarat Health Services (Adeegyada Caafimaadka ee Ballarat). SWEP waxay maamushaa dhowr barnaamijyada “taknoolijiyada caawinta” oo kala duwan.

- Aids and Equipment Program (A&EP) – [Barnaamijka Caawiyeyaasha iyo Qalabka]
- Continence Aids (CA) (Caawiyeyaasha Kaadi-ceshanwaaga)
- Domiciliary Oxygen Program (DOP) (Barnaamijka Ogsajiinka Guriga)
- National Disability Insurance Scheme (NDIS) (Mashruuca Caymiska Naafada Qaranka)
- Specialist Equipment Library (SEL) (Maktabadda Qalabka Gaarka ah)
- Supported Accommodation Equipment Assistance Scheme (SAEAS) (Mashruuca Caawimaadda Qalabka Hooyga La-taageero)
- Top-up fund for Children (TFC) (Miisaaniyadda Kor-socodka ee Carruurta)
- Vehicle Modification Subsidy Scheme (VMSS) (Mashruuca Kabidda Dib-u-habaynta Baabuurka)
- Open Place (OP) (Meel Furan)

Wixii macluumaad dheeraad ah ee barnaamijyada laga heli karo SWEP, fadlan ka eeg qaybaha hoose ee Barnaamijka

### **Sidee buu SWEP ii-caawin karaa?**

SWEP waxay siisaa dadka Victoria kuwaas oo ay hayso naafanimo joogtada ama muddo-dheer ah ama kuwo daciif da'da ah oo la siiyo qalabka ama guri iyo baabuur dib-loogu-habeeyey.

Majiro xanibaad da'da ee ka jirta badiba barnaamijyada SWEP.

SWEP wuxuu siiyaa kabidda xagga kharashka qalabka/ama dib-u-habaynta si loo horumariyo madaxbannaanida gurigaaga dhexdiisa, fududaynta ka-qaybgalka bulshada iyo taageerada qoysaska iyo daryeelayaasha xagga kaalintooda.

### **Waa maxay kharashku?**

Barnaamijyada qaarkood waxay bixiyaan qalab duug ah ama dib-loo-habeeyey. Barnaamijyada qaarkood waxay daboolaan kharashka buuxa ee qalabka ama/iyo dib-u-habaynta isla markii barnaamijyo kalena leeyihiin heerarka kabidda ee ugu sarreysa ee xagga caawiyaasha iyo qalabka ah. Fadlan ka eeg qaybaha-hoose ee Barnaamijka wixii macluumaad dheeraad ah.

### **Waa maxay noocyada qalabka ama dib-u-habaynta la heli karaa?**

- Qalabka mayrashada/qubayska/musqulaha
- Sariiraha/joodariyaasha/kaabayaasha sariiraha
- Waxyaalaha kaadi-ceshanwaaga
- Caawiyeyaasha codka elagtarooniga ah
- Yunidyada ilaalinta beya'dda
- Dib-u-habaynta guriga
- Orthotics iyo waxyaalaha cagaha la gashado
- Qalabka Ogsajiinka
- Qalabka daryeelka cadaadiska
- Fadhiga gaarka ah
- Qalabka xawilidda
- Dib-u-habaynta baabuurka
- Caawiyeyaasha socodka iyo taagnida

Somali

- Wheelchairs-ka (ay ka mid yihiin macmiilka) iyo scooters-ka
- Wigs-ka

Wixii liiska qalabka oo faahfaahsan ah iyo dib-u-habaynta laga heli karo barnaamijkeena, fadlan ka eeg website-keena: <http://swep.bhs.org.au>

Fadlan ogsoonaada in barnaamijyada kala duwan ay maalgeliyaan waxyaalaha qalabka kala duwan ah waxayna leeyihiin shuruudo xaq-u-yeelasho kala duwan ee maalgelinta. Fadlan ka eeg qaybaha-hoose ee barnaamijka wixii macluumaad dheeraad ah

### **Sidee baan u codsadaa?**

Waxaad u baahan tahay inuu ku qiimeeyo xirfad-yaqaan caafimaad oo habboon oo oo degaankaaga ah kaas oo kaa caawin doona go'aansiga qalabka aadka kuugu habboon iyo dib-u-habaynta loo baahan yahay. Taasna waxaa ka mid ah qiimaynta inaad adigu ama daryeelahaaga aad si ammaan ah u isticmaali kartaan qalabka.

Haddii aad ku cusub tahay SWEP, ayadoo ku xiran barnaamijka aad codsanayso, waxaad u baahan doontaa inaad soo buuxiso Foomka Xaq-u-yeelashada oo ay ku qoran yihiin dhammaan faahfaahinta shaqsiyadaada. Haddii ay saas tahay, waxaad u baahan doontaa inaad ballan u samaysato si aad u aragto dhaqtar ku daaweeya/takhasusle si uu u buuxiyo bogga ugu dambeeya ee Foomka Xaq-u-yeelashada asagoo ku matalaya. Taasi waa in la xaqiijyo inaad xaq u leedahay inaad caawimaad ka hesho SWEP.

Dhaqtakaaga ayaa foomkan u diraya SWEP oo uu la socdo foomka qoritaanka. Foomka qoritaanka ayaa kuu caddaynaya talooyinka qalabkooda/dib-u-habayntooda. Hadba ayadoo ku xiran qalabka aad u baahan tahay taas waxay noqon kartaa dhaqtarka Hadalka, Teerabiistaha Goobaha, Fisiyoteerabiistaha, Dhaqtarka Cagaha, Orthotist, Kalkaaliyaha Kaadiceshanwaaga ama Dhaqtarka Neef-mareenka.

Isla markii la helo codsigaagii ayey SWEP kula soo xiriiraysaa si ay kuugu sheegto waxa dhacaya oo intaas ku xiga. Qalabka dib-loo- bixiyey ayaa dhaqtarkaagu heli karaa si uu kuugu codsado hadduu kugu habboon yahay. Haddii qalabka dib-loo- bixiyey ama lacagihii aan isla markiiba la heli karin markaas qalabkii wuxuu galayaa liiska sugitaanka.

### **Yaa iska leh qalabka amaahda oo laga helo SWEP?**

Markii SWEP ay bixiso wax ka badan 50% kharashka walaxda markaas SWEP ayaa yeelanaysa walaxdaas. Tan waxa keliya oo ay khuseysaa haddii ay walaxdu tahay mid dib loo bixin karo haddii aadan u sii baahnayn.

Haddii aad bixiso 50% wax ka badan kharashka walaxda waxaad lahaanshaha ku wareejin kartaa SWEP si aan u daboolno kharashka dayactirka. Haddii aad sidaas samayso, waxaad u baahan doontaa inaad qalabka u soo celiso SWEP markii aadan u sii baahnayn.

Qalabka kharashka yar, waxyaalaha shaqsiga ah sida wigs-ka iyo orthotics-ka, iyo dib-u-habaynta guriga/baabuurka waxay sii ahaanayaan hantida macaamiilka ama milkiilaha guriga/baabuurka.

### **Maxaan sameeyaa haddii aadan u baahnayn qalabka aan ka soo amaahday SWEP?**

La xiriir SWEP waxaana ka wada hadli doonaa bal in qalabka dib loo bixin karo. Haddii ay saas tahay, waxaan diyaarin doonaa in qalabka la soo ururiyo.

### **Maxaan sameeyaa haddii qalabkii aan isticmaalayey uu jabo?**

Somali

Wac: **1300 PH SWEP (1300 74 7937)**, riix 1 wixii Dayactiradas kooxda SWEP markaas waxaan diyaarin doonaa in qalabkii lagu dayactiro ama waxaan kugula talin doonaa wax ku saabsan sida loo baddeli karo haddii aan la samayn karin.

Haddii qalabkaagii uu jabo saacadaha shaqada ka dib wac **1300 PH SWEP (1300 74 7937)**. Kan wuxuu kugu toosinayaa Adeegga Degdegga saacadaha shaqada-ka-dib.

### Sidee baan ra'yi-celis u bixiyaa?

Haddii aad qabto wax cabasho ah ama faallo ku saabsan adeegeena, waxaa jira habab kala duwan oo loo sameeyo. Ra'yi-celinta waxaa lagu soo gudbin karaa:



**Cinwaanka** P.O. Box 1993  
Bakery Hill BC Vic 3354



**Email-ka** [swep@bhs.org.au](mailto:swep@bhs.org.au)  
**Website-ka** <http://swep.bhs.org.au>



**Taleefanka** 1300 747 937  
**Fax** 03 5333 8111



**Haddii aad u baahan tahay adeegga turjumaanka fadlan wac:**

**131 450**

Fadlan ka eeg qaybta-hoose ee ra'yi-celiskeena wixii macluumaad dheeraad ah.

### Sida naloola soo xiriiro

Waxaan shaqaynaa inta lagu jiro saacadaha shaqada caadiga ah laga bilaabo 8.30am – 5.00pm Isniinta ilaa Jumcaha waxaa jira adeegga saacadaha shaqada-ka-dib wixii burbur degdegg ah.

**P:** 1300 747 937 (1300 PH SWEP) ama 03 5333 8100

Haddii aad u baahan tahay turjumaan, fadlan wac: 131 450

**F:** 03 5333 8111 **E:** [swep@bhs.org.au](mailto:swep@bhs.org.au)

**Website-ka:** <http://swep.bhs.org.au>

### Cinwaanka Boostada:

Barnaamijka Qalabka Dowlad-goboleedka oo dhan ah  
PO Box 1993  
Bakery Hill, VIC 3354